

Tix: GSH/B-10/001/17

Kalfadhiga: 1aad

Kulankiisa: 7-aad iyo 8-aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

11 – 12 Janaayo 2017



JUMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

DOORASHADA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA

**(GUDDOOMIYAH, GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA 1-AAD
IYO GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA 2-AAD)**

Muqdisho, 11 – 12 Janaayo 2017

A handwritten signature in black ink, appearing to read "J. H. S." or a similar initials.

GOLAHA SHACABKA:

Markuu arkay: Qodobka 65-aad Faqradda 4-aad ee Dastuurka sida ku-meel-gaarka ah loo ansixiyey;

Markuu arkay: Qodobka 62-aad Faqradda “D” ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;

Markuu arkay: Taariikh Nololeedka Musharraxiinta u tartamaya qabashada Xilka Guddoonka Golaha Shacabka (Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad iyo Guddoomiye Ku-xigeenka 2-aad).

WUXUU GUDDOONSADAY SIDA HALKAN HOOSE KU XUSAN:


Qodobka 1-aad: Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Afar (4) Musharrax waxaana goobjoog ah oo codeynayey 259 xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	2	257	259
2-aad	-	-	-
3-aad	-	-	-

#	Magaca Musharraxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad	Wareegga 3-aad
1.	Xil. Muxammad Sh. Cusman Jawaari	141 (54.44%)	-	-
2.	Xil. Cabdirashid Maxamed Xidig	97 (37.45%)	-	-
3.	Xil. Cabdiftah Maxamed Ibrahim “Geesey”	17 (6.56%)	-	-
4.	Xil. Idris Cabdi Taktar	2 (0.77%)	-	-

Fiiro gaar ah, Musharrax Xil. Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad maadaama uu helay cododkii loo baahnaa wareegga 1-aad oo ah (50%+1) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka iyo dheeraad.



Qodobka 2-aad:**Doorashada Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka**

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Lix (6) Musharrax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 259 xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	259	259
2-aad	1	257	258
3-aad	-	-	-

#	Magaca Musharraxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad	Wareegga 3-aad
1.	Xil. Cabdiweli Ibraahim Sh. Muudey	111 (42.85%)	164 (63.56%)	-
2.	Xil. Faarax Sheekh Cabduqaadir	94 (36.29%)	93 (36.04%)	-
3.	Xil. Khadiija Maxamed Diiriye	26 (10.03%)	-	-
4.	Xil. Saciid Xuseen Ciid	17 (6.56%)	-	-
5.	Xil. Khaalid Macow Cabduqaadir	7 (2.70%)	-	-
6.	Xil. Jeylaani Nuur iikar Sh. Suufi	4 (1.54%)	-	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2-aad waxaa iskood uga tanaasulay Xil. Khadiija Maxamed Diiriye iyo Xil. Xuseen Saciid Ciid oo xaq u lahaa iney tartamaan.

Fiiro gaar ah, Musharrax Xil. Cabdiweli Ibraahim Sh. Muudey ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya maadaama uu helay cododkii loo baahnaa oo ah (50%+1) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka iyo dheeraad.

Qodobka 3-aad:**Doorashada Guddoomiye Ku-xigeenka 2-aad ee Golaha Shacabka**

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 2-aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Toban (10) Musharrax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 259 xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	1	258	259
2-aad	0	258	258
3-aad	-	-	-

#	Magaca Musharraxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad	Wareegga 3-aad
1.	Xil. Mahad Cabdalla Cawad	71 (27.41%)	171 (66.27%)	-
2.	Xil. Cabduqaadir Sh. Cali Ibraahim “Baqdaadi”	51 (19.69%)	87 (33.72%)	-
3.	Xil. Cabduraxman Adan Ibrahim “IBBI”	36 (13.89%)	-	-
4.	Xil. Burhan Adan Cumar	26 (10.03%)	-	-
5.	Xil. Abdullaahi Goodax Barre	18 (6.94%)	-	-
6.	Xil. Dr. Xuseen Cabdi Cilmi	14 (5.40%)	-	-
7.	Xil. Dr. Cilmi Maxamuud Nur	12 (4.63%)	-	-
8.	Xil. Cabdiweli Maxamed Qanyare	12 (4.63%)	-	-
9.	Xil. Maryan Axmed Haarun	10 (3.86%)	-	-
10.	Xil. Abdullaahi Xuseen Cali “Cabdalla”	8 (3.08%)	-	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2-aad waxaa iskood ugu tanaasulay Xil. Cabduraxmaan Adan Ibrahim “IBBI” iyo Xil. Burhan Adan Cumar oo xaq u lahaa iney tartamaan, saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 3-aad maadaama ay isku soo hareen laba Musharrax kaliya;

Fiiro gaar ah, Musharrax Xil. Mahad Cabdalla Cawad ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 2-aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya maadaama uu helay cododkii loo baahnaa oo ah (50%+1) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka iyo dheeraad.

Qodobka 4-ad:


Guudoonka Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad


Guudoonka Golaha Shacabka Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya oo xilhayntiisu tahay 2016-2020 waa:

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
M.ne Cabdiwali Ibraahim Sh. Muudey
M.ne Mahad Cabdalla Cawad


Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad
Guddoomiye Ku-xigeenka 2-aad

Waxaa saxiixay


M.ne Cusmaan Cilmi Boqore
Shir-Guddoomiyaha KMG


M.ne Cabdiraxmaan Ducaale Beyle
Guddoomiyaha Guddiga Doorashada Guudoonka

Arkay: ha loo diro Faafinta Rasmiga ah ee Golaha Shacabka


M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

